



Dabaylo Duufaan

Dayr iyo jiilaal kasta, dabaylo duufaan ayaa sababa khasaare balaadhan, oo ay ku jiraan korontada oo ka go'da aagga Baasifigga Waqooyi-galbeed. Marka aad hadda talaabo qaadid, waxa aad badbaadin karta naf oo aad yareyn kartaa khasaraha ay keenaan dabaylaha duufaanka iyo halista kale ee la xidhiidha cimilada.

Waxa la sameeyo ka hor dabayl duufaan

- La xidhiidh xafiiska maamulista degdegga ee degmadaada ama Adeegga Cimilada ee Qaranka (National Weather Service) si aad u ogaatid nooca duufaan ee laga yaabo inuu ka dhaco aaggaaga.
- Isku keen xidhmo ah alaabooyinka masiibada.
- Haddii aad haysatid koronto-dhaliye ah nooca guriga, u hubso inaad taqaanid sida ammaanka ah ee loo isticmaalo. Raac dhammaan fariimaha oo la xidhiidh iibiyaha, haddii loo baahdo. Isticmaalka aan sax ahayn ee koronto-dhaliye waxay sababi kartaa sumowga kaarbon monoksaydh.
- Ogow cidda aaggaaga ah ee u baahan gargaar gaar ah, sida waayeelka, naafada, iyo deriska aan ku hadlin Ingiriisiga.
- Dhakhtarkaaga xayawaanka weydii fariimo daryeel oo la raacayo marka ay jirto xaalad degdeg ah.
- Haddii aad ku nooshahay xeebta ama dhul xeebta ah, waa inaad taqaanid jidadka qaxidda.
- Garo qorsheyaasha degdegga ee ka jira goobtaada shaqada, dugsiga iyo xarunta sii-haynta ilmaha.
- Samee qiimeyn ammaan guri si aad u ogaatid geedaha dhow ee soo dhici kara marka ay jirto dabayl duufaan.
- Haddii aad leedahay albaab-fure geerash oo ku shaqeeyaha koronto, hel sida gacanta loogu furo albaabka.

Waxa la sameeyo marka ay socoto dabayl duufaan

- Ha fiigin ama cabsi yay ku qaadan. Qaad talaabo dhakhso ah si aad u badbaadisid naftaada iyo dadka kale.
- Dami shoolada haddii aad wax karinaysay marka korontadu go'do, oo dami qalabka ku shaqeeya gaasta dabiiciga ah.
- Marna shoolada gaas ku shaqeysa ha u isticmaalin kulaylin guri.
- Marna dhuxul ha ku gubin gudaha guriga.
- Marna koronto-dhaliye ha ku isticmaalin gudaha guriga ama gudaha geerash ama goob lagu xereeyo baabuurka.

- Haddii aad joogtid gudaha, ka dhaqaaq daaqadaha ama alaabta soo dhici karta. Tag dabaqyada hoose marka aad joogtid guri leh dhawr dabaq.
- Haddii aad dibadda joogtid, gal dhisme. Iska ilaali khadadka korontada ee soo go'ay, tiirarka adeegyada sida korontada iyo dhirta.
- Haddii aad baabuur wadid, ka bax jidka oo joogso meel ka fog dhirta. Haddii ay suurto gal tahay, u lugee dhisme ammaan ah. Iska ilaali jidadka dul mara jid kale, khadadka korontada iyo halista kale.
- Raadyahaaga ka dhegayso fariimaha degdegga.

Waxa la sameeyo ka dib dabayl duufaan

- Naftaada iyo dadka kale ee agagaarkaaga ka fiiiri dhaawacyo.
- Ka bax dhismeyaasha dhaawacmay. Dib ha u soo galin ilaa madaxdu ku dhawaaqyo inay ammaan yihiin.
- Wac 9-1-1 kaliya si aad u soo sheegtid xaalad degdeg ah oo nafta halis galinaysa.
- Haddii ay kuu urto gaas ama aad maqashid sanqadh "fiish" leh oo ah gudaha — fur daaqada oo ka bax dhismaha. Bakhtii kaydka gaasta oo wac shirkaddaada gaasta. Gudaha ha ku isticmaalin kabriid/taraq, shumac, olol qaawan ama iswiijyo koronto.
- Haddii korontadu go'do, ha xidhnaadaan albaabada qaboojiyaha iyo barafeeyuhu si cuntadu baraf u ahaato ilaa laba maalmood.
- Fadlan gargaar sii deriskaaga, gaar ahaan waayeelka ama naafada.
- Isku day inaad la xidhiidhid qofka aad ku talogashay in aad kula xidhiidhid teleefonka ee ka baxsan aagga, laakiin iska ilaali inaad sameysid wicitaano ah degmada.
- Raadyahaaga gacanta ama idaacadda cimilada kala soco fariimo ama ogeysiis rasmi ah oo leh "waa dhammaatay." Idaacadaha ayaa baahin doona waxa la sameynayo, goobta ay ku yaalaan gaboodyada degdegga iyo saldhigyada gargaarka caafimaadka, iyo baaxadda khasaaraha.



PO Box 47890
Olympia, WA 98504-
7890

Bogga Internetka:
www.doh.wa.gov

360-236-4027
(800) 525-0127

DOH Pub 821-042
Somali